

Hexabromocyclodecane (HBCD)

Waa maxay HBCD?

Hexabromocyclodecane (HBCD) waa maado debka demisa oo lagu daro alaabooyinka si loo yareeyo faafitaanka dabka. Laga soo bilaabo 2018, shirkadaha wax soosaarka Mareykanka ayaa joojiyay isticmaalka maadada HBCD ee loo isticmaalo alaabta ay sameynayaan. Hase yeeshee, kiimikadan ayaa horey loogu isticmaalay agabka dahaarka xumbada aho loogu talagalay sameynta iyo dhismaha iyo sameynta alaabta guryaha, oo ay ku jiraan alaabta fadhiga, joodariyaasha, waraaqaha derbiga lagu dhejiyo, daahyada, iyo elegtaroonigga. [Xeerka Minnesota \(Minnesota Statute\) 325F.071](#) wuxuu xadidayaa warshadeynta, iibinta, iyo qaybinta alaabada carruurta, alaabta guryaha la dhigto, dharka guryaha, iyo joodariyaasha/firaashyada ay ku jiraan maadada HBCD qadar ka badan 1,000 qaybood halkii milyan qayb kasta ee qeyb ka mid ah alaabtaas. HBCD waxay la xiriirtay khataraha caafimaad ee suurtagalka oo looga baqayo ilmaha dhallaanka ah, carruurta yaryar, iyo dumarka uurka leh.

HBCD waxaa laga heli karaa alaabta guryaha, oo ay kuwa ugu badan yihiin alaabta duqa ah (la sameeyay 2018 ama ka hor) alaabtaas guryaha waa, sida:

- Alaabaha carruurta (bustayaasha duqa ah, dharka, iyo alaabta lagu ciyaaro).
- Qalabka guryaha (sida kuraasta) ee marada lagu duubay.
- Dharka Guryaha.
- Joodariyada oo ay ku jiraan maadada dabka demisa.

Yaa ugu badan ee halista ugu jira soo gaarista maadadaas iyo khataro caafimaad?

- Ilamaha dhallaanka ah iyo carruurta yaryar ayaa halista ugu badan ugu jira dhibaataada maadada maxaa yeelay waxay u dhow yihiin dhulka waxayna u badan yihiin in ay neef ahaan u qaataan maadada oo xitaa iyada oo aan la fileyn ay cunaan boor maadadu la socoto. Yaraanta jirka carruurta yaryar iyo koboco ku socda xubnahooda ayaa sidoo kale halis u gelin karta inay soo gaarto cawaaqib xumo caafimaad.
- Dumarka uurka leh iyo ilmaha uur ku jirta ah ayaa halis ku jira sababta oo ah waxay aad ugu nugul yihiin soo gaarista kiimikooyinka sababo la xiriira walaaca koboca ilmaha.

Sidee bey dumarka uurka leh u soo gaari kartaa maadada HBCD?

- Isticmaalka alaabaha guriga ee duqa ah (la sameeyay 2013 ama ka hor) (oo ay ku jiraan

HEXABROMOCYCLODODECANE (HBCD)

joodariyaasha, alaabta guryaha, daahyada culus, iyo daaha caadiga ah) ee lagu sameeyay HBCD.

- Qaadasha neef boorka guriga leh ee ku wasakheeyay HBCD. HBCD waxay ka soo dusi kartaa (baxsan kartaa) alaabooyinka guriga ama dahaarka xumbo duq ah waxayna ku soo darsami kartaa boorka guriga.

Sidee bey ilmaha dhallaanka ah iyo carruurta yaryar u soo gaari kartaa saameynta HBCD?

- Qaadasha neef boorka guriga leh ee ku wasakheeyay HBCD. HBCD waxay ka soo dusi kartaa (baxsan kartaa) alaabooyinka guriga ama dahaarka xumbo duq ah waxayna ku soo darsami kartaa boorka guriga.
- Qaadaashada (cunista) boorka guriga oo ay gaartay HBCD sababo la xiriira kororka gacanta iyo afka istaabsiintooda oo korortay darteed.

Maxaa la samayn karaa si loo yareeyo soo gaarista HBCD?

- Nadiifi hawo mareenada gurigaaga oo xaaq/fiig fadhiga guriga iyo meelaha aad ku nooshahay marar badan.
- Marar badan ku masax maro qoyan dusha sare meelaha boorka leh ee guriga.
- Haddii ay suurtagal tahay, ka saar oo si quman u tuur alaabta guriga ee duqa ah (la sameeyay ka hor 2018), sida joodariyaasha/furaashyada, alaabta fadhiga guriga, daahyada culus, iyo daahyada caadiga ah ee ay ku jiri karaan HBCD.
- Ka fikir iibsashada alaabaha aan lahayn maadada olol yareynta.
- Gacmaha dhaq ka hor diyaarinta iyo cunista cuntada iyo wakhtiga ciyaarta carruurta kadib.

Maxay yihiin walaaca caafimaad ee HBCD laga qabo?

Daraasado ku saabsan xayawaanka shaybaarka ayaa muujiyay saameynta caafimaad ee xun ee ka timaada soo gaarista kiimikadan. Saameyntan caafimaad waxay walaac u keeneysaa caafimaadka aadanaha waana muhiim in la tixgeliyo, gaar ahaan marka loo eego carruurta. Carruurta way ka nugul yihiin dadka waaweyn, sidoo kalena soo gaarsteeda waxaa laga yaabaa in ay ka sareeyso maadaama ay badan tahay inta jeer ay ilmuhu gacantooda afka geliyaan. Qaar ka mid ah saameynta caafimaad ee xun ee lagu arkay xayawaanka shaybaarka waxaa ka mid ah:

- Saamaynta Caafimaadka Habdhaqanka.
- Walaaca koboco maskaxda.
- Waxyeelo taranka ah.
- Dhibaatooyinka qanjirka taayroodka (thyroid).
- Saamaynta sunta ah ee beerka.

Ilo Dheeraad ah

[CDC | What employers should know about reproductive health](https://www.cdc.gov/niosh/reproductive-health/about/employers.html)
(<https://www.cdc.gov/niosh/reproductive-health/about/employers.html>)

[NIH | Flame Retardants and Your Health \(PDF\)](https://www.niehs.nih.gov/health/materials/flame_retardants_508.pdf)
(https://www.niehs.nih.gov/health/materials/flame_retardants_508.pdf)

[Connecticut Department of Public Health | Flame Retardants in Children's Products \(PDF\)](https://portal.ct.gov/-/media/dcp/migrated-docs/flameretardantfactsheetpdf.pdf)
(<https://portal.ct.gov/-/media/dcp/migrated-docs/flameretardantfactsheetpdf.pdf>)

[EPA | Risk Evaluation for Cyclic Aliphatic Bromide Cluster \(HBCD\)](https://www.epa.gov/sites/default/files/2020-09/documents/1_risk_evaluation_for_cyclic_aliphatic_bromide_cluster_hbcd_casrn25637-99-4_casrn_3194-5_casrn_3194-57-8.pdf)
(https://www.epa.gov/sites/default/files/2020-09/documents/1_risk_evaluation_for_cyclic_aliphatic_bromide_cluster_hbcd_casrn25637-99-4_casrn_3194-5_casrn_3194-57-8.pdf)

[EPA | Nontechnical Summary of the Risk Evaluation for Cyclic Aliphatic Bromide Cluster \(HBCD\) \(PDF\)](https://www.epa.gov/system/files/documents/2022-06/non_tech_summary_HBCD_6_22_22.pdf)
(https://www.epa.gov/system/files/documents/2022-06/non_tech_summary_HBCD_6_22_22.pdf)

[Office of the Revisor of Statutes | 325F.071 FLAME-RETARDANT CHEMICALS; PROHIBITION](https://www.revisor.mn.gov/statutes/cite/325F.071)
(<https://www.revisor.mn.gov/statutes/cite/325F.071>)

[EPA | Hexabromocyclodecane \(HBCD\) \(PDF\)](https://www.epa.gov/sites/default/files/2015-09/documents/rin2070-az10_hbcd_action_plan_final_2010-08-09.pdf)
(https://www.epa.gov/sites/default/files/2015-09/documents/rin2070-az10_hbcd_action_plan_final_2010-08-09.pdf)

[EPA | Addition of Hexabromocyclododecane \(HBCD\) Category to TRI List Final Rule](https://www.epa.gov/toxics-release-inventory-tri-program/addition-hexabromocyclododecane-hbcd-category-tri-list-final)
(<https://www.epa.gov/toxics-release-inventory-tri-program/addition-hexabromocyclododecane-hbcd-category-tri-list-final>)

Minnesota Department Of Health (Waxda Caafimaadka Minnesota)
[Barnaamijka Sunta ka Maran ee Caruurta \(Toxic Free Kids Program\)](#)
651-201-4899
health.risk@state.mn.us www.health.state.mn.us

05/24/2024

Si aad xogtaan ugu hesho qaabab kale, wac: 651-201-4899.